

Ogow DHAMMAAN faa'iidooyinkaaga



Diiiradda la saarayo: **Isku daaweynta irbadaha 'acupuncture' ee loogu talagalay yareynta xanuunka iyo daaweyntta isticmaalka mukhaadaraadka**

Waxaanu rabnaa in aanu yeelano fursado badbaado, caafimaad leh oo loogu talagalay yareynta xanuunka. Faa'iiddadaada CareOregon waxaa ka mid ah isku daaweynta irbadaha 'acupuncture' oo loogu talagalay xaalado badan oo xanuun badan yeelan kara.

Adeeg bixiyayaasha ayay dhici kartaa in ay oggolaadaan isku daaweynta irbadaha 'acupuncture' oo loogu talagalay xaaladaha sidan oo kale ah



Uur lahaanshaha – xanuunka dhabarka iyo miskaha



Xanuunka la xiriira kansarka



Madax xanuunka daran



Xaaladaha dhabarka iyo laf dhabarta



Jilba xanuunka (arthritis)



Daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka, sida nikotiinka, opioids ama waxyaabaha kale, iyada oo qayb ka ah qorshaha Daaweynta Caawinta Caafimaad

Sida loo helo isku daaweynta irbadaha 'acupuncture' oo uu daboolo qorshahahaaga caafimaad

- ▶ Adeeg bixiyahaagu waa in uu oggolaadaa isku daaweynta irbadaha 'acupuncture' iyada oo qayb ka ah daaweyntaada.
- ▶ Haddii aad u maleynayso in uu waxtar yeelan karo, waxaad ka codsan kartaa adeeg bixiyahaaga in uu oggolaado iyada.
- ▶ Waxaanu u bixinaa faa'iidadani sida ay dhigayaan tilmaamaha Qorshaha Caafimaadka ee Oregon.
- ▶ Xarumaha caafimaadka ee isku daaweynta irbadaha 'acupuncture' ayaa ku qoran buugeena tilmaamaha adeeg bixiyaha: careoregon.org/find-a-provider

Su'aalaha?

- ▶ Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan daaweynta irbadaha 'acupuncture' ama fursadaha daaweynta xanuunka, ama u baahan tahay caawimaad kale, waxaad **Adeega Macmiilka CareOregon** ka wacdaa **800-224-4840** ama **TTY 711**, ama farriin ammaan ah noogu soo dir careoregon.org/portal

Isku daaweynta irbadaha ‘acupuncture’ waxaa caymiskiisa daboola CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid. Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).



Health Share of Oregon (HSO) waa waxa loo yaqaano daryeelka urruradu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.



CareOregon waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya n ay bixiso daryeel. Wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah ‘naturopath’. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiiyayaasha iyo kuwo kale.



Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah ‘naturopath’. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiiyayaasha iyo kuwo kale.



CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- ▶ Daryeelka caafimaadka jirka
- ▶ Daryeelka caafimaadka dhimirka
- ▶ Isticmaalka mukhaadaraadka
- ▶ Daryeelka ilkaha
- ▶ Medicare la sii marayo
CareOregon Advantage
- ▶ Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- ▶ Isku duwida daryeelka
- ▶ Farmashiyaha
- ▶ Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- ▶ Kala doorashada gaadiidka
- ▶ Adeegyada turjumaada luqadda
- ▶ ER iyo daryeelka degdega ah

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa lacag la’aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711.

